

U Midaysan Caddaalad

SEIU Local 1

NOFEEMBAR, 2013

Mudaharaadka Shaqada Silinbeyaasha Columbus

Gacaliye walaaleyaal:

Gorgortanka heshiiska shaqada in ka badan 1,000 silinbeyaal ee ku nool Columbus wuxuu joogsadey bisha Seteembar markii ABM, shirkadda nadaafada ugu wayn ee dalka diidey inay taageerto shaqooyin waqti buuxa oo qoysaska lagu masruufi Karo.

Silinbeyaasha aaga Columbus waxay sameeyeen mudaharaad shaqo kadib markii cabsi-gelin iyo kadeedis ku sameeyeen ABM iyo shirkadaha kale ee nadaafadda markii ay codsadeen wanaajinta shaqadooda, xaq-xumada shaqada wuxuu jebinaaya xuquuqdooda sida u qabo sharciga Federaaliga. Mudaharaadka shaqo dalka oo dhan ayaa laga aqoonsadey goor dalkeena laga doodayo dadka mas'uul ka ah aasaaska shaqoyin qoyska lagu masruufi karo oo fiican.

Iminka, silinbeyaasha Columbus lacag aad uu yar ayaa la siiyaa sidaas awgeeda waxay xaq u leeyihiin barnaamajyo gargaar dowladeed oo badan. Shirkadda silinbeyaasha ABM wuxuu sameeyey 136 milyan doolar oo faa'ido ah sanadka 2012. Guddoomiyaha ABM, Henrik Slipsager waxaa la siiyey \$2.6 milyan, silinbeyaasha Columbus oo waqtiga buuxa shaqeeya waxaa ku yar lacagta, waxayna ku qasbaan yihiin inay xulasho ka sameeyaan iibsashada baasiin iyo cuntada.

Waxaa nalaga rabey inaan xulasho sameyno. Inaan iska ogolaano in silinbeyaasha Columbus ee u shaqeeyo ABM noqdaan kuwo saacado yar shaqeeyo — iyo dhammaantooda sidaas ka noqdaan dalka oo dhan — ama ka hor istaagno iyo la dagaalanno arrintaan.

ABM waa shirkad wayn oo milyan doolar badan sameeyo. Magaalo walba uu ka hawlgalo ururka SEIU ayaa ina caawin doono si aan ugu guulaysano arrintaan, ma ahan kaliya Columbus, waxaan u dagaalamayna dadka oo dhan ee si adag u shaqeeyo, meel walba ha joogaan.

Si midnimo ah,



Tom Balanoff

Guddoomiyaha SEIU Local 1



“Waxaa nalaga rabey inaan xulasho sameyno. Inaan iska ogolaano in silinbeyaasha Columbus ee u shaqeeyo ABM noqdaan kuwo saacado yar shaqeeyo — iyo dhammaantooda sidaas ka noqdaan dalka oo dhan — ama ka hor istaagno iyo la dagaalanno arrintaan.”



Dagaalka ka socdo Columbus wuxuu raad ku yeelan doonaa dhammaan Magaaloyinka uu ka hawlgalo Local 1

Silinbeyaasha Columbus waxay dhab ahaan u dagaalamayaan dhammaan xubinada SEIU Local 1. Gorgortanka heshiisyada shaqada ee goor dhow laga bilaabi doono magaalada Cincinnati, Indianapolis iyo Milwaukee—iyo magaaloyin kale ee ku yaalo dalka—waxay la kulmi doonaan isla dhibaatooyinka ay abuureen ABM iyo qandaraaslayaasha kale oo codsan doono in shaqaalaha ku shaqeeyaan waqti gaaban. Waa inaan si wadaag ah ula dagaalanno!

CINCINNATI Silinbeyaasha Cincinnati waxay sii wadaan inay u dagaalamaan heshiis shaqo xaq ah. Warbixino ka soo baaxey magaalada Cincinnati ayaa sheegey in dhaqaalaha sii fiicnaanaayo, laakiin badanaa muwaadintooda weli waxay dhibaato ku qabaan lacagta noolool maalmeedka. Silinbeyaasha oo nadiifiyo xafiisyada shirkadaha ugu taajirsan dalka sida Macy, GE, Proctor and Gamble, iyo Citigroup, waxay u dagaalamaayaan dhaqaale lagu dhisi doono Cincinnati ka xoog badan. Inkastoo uu Cincinnati yahay magaalada xiga ee Local 1 ku gorgortami doono heshiiskooda shaqada, silinbeyaasha Cincinnati waxay diyaar u yihiin inay la dagaalamaan ABM si ay u helaan shaqoyinka waqti buuxa ay ku masruufaan qoysaskooda.

INDIANAPOLIS Silinbeyaasha Indianapolis waxay isku diyaarinayaan inay gorgortamaan heshiis xaq ah oo saamayn ku yeelan doono ugu dhowaan 700 silinbeyaal iyo qoyskooda. Siciirada saboolnimada magaalada Indianapolis si dhidban ayeey u koreen 10ka sano ee la soo dhaafey waxayna gaareen boqolkiiba 20. Silinbeyaasha Indianapolis waxay ku biireen shaqaale kale ee mushaar yar qaato si ay ula dagaalamaan mustaqbal ka fiican qoysaska shaqeeyo ee Indianapolis.

MILWAUKEE Milwaukee, xafiisyada badan ee wayn ee bartamaha magaalada ku yaalo waxay shaqo siiyaan xubinada SEIU Local 1 iyo shaqoyin fiican ayeey magaaladeena ka baxshaan, kuwaaso leh mushaar fiican, taageero iyo shaqadooda cod ayeey ka bixin karaan. Nasiib xumo, qandaraaslaya nadaafadda aan urur shaqaale qabin ee lagu magacaabo CleanPower ayaa hakiyey horumarka Milwaukee. CleanPower waxay baxshaan mushaaro aad u yar, waxayna shaqaalaha ku qasbaan inay codsadaan gargaarada dawladda si ay wax uga qabtaan baahidooda aasaasiga ah, iyo waxay handadaan shaqaalaha oo ka qayb-qaato wax-qabadyada ururyada shaqada. SEIU Local 1 waxay la dagaalamaan qandaraaslayaasha mas'uuliyad la'aanta ah sida CleanPower ee Milwaukee. Waxaan u dagaalamnaa shaqoyin fiican iyo xuquuqda dhammaan shaqaalaha! !

Sanadka Waardiyayaasha Wu Sii Socdaa



Ka dib markii aan waardiyayaasha bartamaha magaalada ka shaqeeyo ku caawiney inay helaan heshiis shaqo taariikhi ah, waardiyayaasha nawaaxiga waxay bilaabeen inay shaqo-bixyahooda la gorgortamaan heshiis cusub Isniinta, 7da Oktoobar. Waardiyayaasha nawaaxiga waxay rabaan heshiis shaqo oo leh caymis caafimaad ka raqiisan iyo mushaar ka fiican. Waardiyayaasha

Chicago iyo kuwa nawaaxiga waxay ilaaliyaan qaar ka mid ah ganacsiyada ugu taajirsan ee gobolka, laakiin waxay qaataan mushaar aad u yar oo ay ku masruufi karin qoyskooda.

Shaqaalaha Geralex ee O'Hare waxay xushteen inay ku biiraan SEIU Local 1

In ka badan 300 shaqaale ayaa Kirismaska la soo dhaafey shaqo ku waayey O'Hare, markii duqa magaalada Rahm Emanuel shaqo siiyey qandaraasle aan urur shaqaale qabin iyo burcad xiriir la leh. 18ka Seteembar, shaqaalaha Geralex ee garoonka diyaaradaha O'Hare waxay badnaantooda isla xushteen inay ku biiraan ururka shaqaalaha SEIU Local 1. Inkastoo iminka la guuleystey, shaqaalaha waxay xushteen guddiigooda gorgortanka iyo waxay bilaabi doonaan inay gorgortamaan heshiis shaqo cusub!



Nasiib xumo shaqaalaha United Maintenance, shirkadda nadaafadda kale ee O'Hare, kuma biirin ururkeena shaqaale. Waxaan sii wadi doonnaa inaan u dagaalanno shaqooyin la hayn karo iyo xaq ah garoonka diyaaradaha labaad ee ugu wayn dalkeena.

SEIU Local 1 Wu Sii Korey Detroit

Detroit waxuu bilaabey inuu is-abaabulo! Kooxdeena Detroit waxay heshiis la geleen shirkada waardiyayaasha ugu wayn ee magaalada oo u ogolaadey shaqaalaha inay dhisaan urur shaqaale—tallaabo wayn sii dhammaan waardiyayaasha Detroit lagu qoro urur shaqaale, oo iminka la siinin mushaar ku filan ay ku masruufaan qoyskooda. Abaabulayaasha xubinada iyo shaqaalaha way isla shaqeeyeen si ay u kordhiyaan silinbeyaasha xubin ka ah ururka magaalada Detroit in ka badan boqolkiiba shan biloyinka la soo dhaafey. Kaasi waxaa loola jeedaa mushaar iyo gargaaro ka fiican silinbeyaasha iyo qoyskooda, iyo guud ahaan dhaqaale ka xooggaan magaalada Detroit. Guulalkaan waxay ku caawiyaan xoojinta dabaqadda dhexe. Hanbalyo, Detroit!



GEESKA SAXAAFADDA


Wakiilada xubinada SEIU Local 1 Claude Smith iyo Freda Prigden ayaa sheekoyinkooda u sheegaayo warbaahinta intuu mudaharaadka shaqada socdey, ayagoo ku caawinaayo dhisidda taageerida shacbiga shaqoyinka waqtiga buuxa ee Columbus.




M NBC
Xildhibaan Kongreeska Luis Gutierrez waxuu xoog saara Dib-u-wanaajinta Hijrada



The Columbus Dispatch
Sharciga Xannaanada Caafimaadka Xiriir Kuma Lahan Ruqsoyinka Shirkadaha



NBC 4
Mudaharaad ayaa ka dhici doono Khilaafka Heshiiska Waardiyayaasha



the Columbus Post
Silinbeyaasha Columbus Waxay Codsadeen Mushaaro Xaq ah

Xarunta Iloyinka Xubinada Wuxuu Furan Yahay Toban Sano

Xarunta Iloyinka Xubinada (MRC) ee SEIU Local 1 wuxuu ku go'an yahay inuu wanaajiyo noloshu xubinadeena iyo abaabulo shaqaalaha ayagoo isla markiiba u dagaalamaayo sharaf iyo caddaalada goobta shaqada.



Khabiiriinta MRC, sida xubinada kooxda ee asalka horey Florence Turner iyo Denise Brassfield, waxay ku caawiyeen xallinta dacwoyinka xubinada ayagoo u heley lacag heshiis ka badan \$360,000 sanadka 2012.

Toban sano ka hor Oktoobarkaan ayaa magaalada Chicago albaabada loo furey Xubinada Xarunta Iloyinka Xubinada ee SEIU Local 1. Maanta, xubin walba ee Local 1 waxaa taageero MRC.

Sanadka la soo dhaafey, MRC wuxuu ka jawaabey 62,879 wicitaanyo, wuxuu hawl ka bilaabey in ka badan 6,165 dacwoyin ay sameeyeen xubinada Local 1 iyo waxay ka jawaabeen 54,698 su'aalo.

SEIU Local 1 Wuxuu la Dagaalamaaya Xattooyada Mushaarka

Shanta sano ee la soo dhaafey, kooxda dacwada SEIU Local 1 waxay dib u soo celiyeen mushaar ka badan \$230,000 oo si sharci darro ah laga goostay shaqaalaha.

Xarunta Iloyinka Xubinada ee SEIU Local 1 waxay kugu caawin karaan bilowga hab-socodka dacwada, helidda nuqulka heshiiskaaga shaqada, waxay kuu sheegi karaan warar ku saabsan gargaarada aad heli kartid iyo macluumaad intaa ka badan. Caawinaad ka codso Xarunta Iloyinka Xubinada Local 1, wuxuu furan yahay Isniin ilaa Jimce laga bilaabo 8:30subaxnimo ilaa 5ta galabnimo CST ka wac **(877) 233-8880** ama soo wac **(312) 233-8880**.